



Rijksinstituut voor Volksgezondheid
en Milieu
Ministerie van Volksgezondheid,
Welzijn en Sport

Si fiican wax ma U maqlaa ilmahaaga yar?

Baaritaanka maqalka caruurta
ee Miriam iyo Dennis





Miriam iyo Dennis waxay haystaan ilmo yar.

Miriam iyo Dennis waxay haystaan ilmo yar

Miriam iyo Dennis way faraxsanyihiin.

Waxay haystaan ilmo yar.

Ilmuhu waxaa uu jiraa dhowr maalmood.

Ilmuhu waxaa lagu magacaabaa Nikki.



Si fican wax ma u maqlaa Nikki?

Ilmuhu si fiican wax ma u maqlaa?

Nikki si fiican wax ma u maqlaa?

Miriam iyo Dennis waxay doonayaan in ay taa ogaadaan.

Taasi waa muhiim. Haddii Nikki si fiican wax u maqlayo si fiican ayuu waqti ka dib hadalka u baran karaa

Ma rabtaa in aad ogaato in ilmahaagu si fiican wax u maqlaan?



Qof dumar ah oo ka socda consultatiebureau ayaa imanaya guriga Miriam iyo Dennis.



Ilmuhu waxa uu ku dhow yahay usbuuc

Nikki hadda waxa uu ku dhow yahay usbuuc.

Qof ka socda xafiiska daryeelka caafimaadka caruurta (consultatiebureauⁱ) ayaa imanaya guriga Miriam iyo Dennis.

Waxay baarayaan in Nikki si fiican wax u maqlo. Tani waxa lagu magacaabaa baaritaanka maqalka.

Mararka qaarkood baartiaanka maqalka waxa u ku sameeyaan consultatiebureau.

Haddii ilamahaagu muddo dheer isbitaalka ku jiro

Halkaa ayay baaritaanka maqalka lagu sameynayaan

Haddii ilmuhu guriga joogo, marka hore waxaa la sameeyaa baaritaanka maqalka

Markaa ka dibna sarida ciribta

Ka akhri macluumaad dheeri ah warbixinta ku saabsan sarida ciribta.

ⁱ Consultatiebureau waa xafiiska daryeelka caafimaadka caruurta



Ilmaha Nikki waxaa lagu samaynayaa baaritaanka maqalka.

Maxay sameynayaan baaritaanka maqalka?

Marka baaritaanka maqalka la sameynayo ilmuhu sariirta ayuu jiifaa ama adigaa haya.

Qolku waa shanqar la'aan.

TV ama radiyaha way densanyihiin.

Waalidka ama caruurta way aamusan yihiin.

Qofka dumarka ah waxay wadataa qalab wax lagu cabiro.

Dabool ayay dhegta ilmaha Nikki gelinaysaa.

Wax xanuun ah ma laha.

Daboolka waxaa ka imanaya dhawaaq yar, adiga ma maqlaysid laakiin ilmahu way maqlayaan.

Baartiaanka dhowr daqiiqado ayuu soconayaa.



Qofka dumarka ah ee ka socda consultatiebureau way dhamaysey. Baaritaanka maqalka.

Ilmuhu si fiican ayuu wax u maqlayaa

Qofka dumarka ah waxaa ay sheegeysaa in laba dhegood si fiican wax u maqlayaan.

Miriam iyo Dennis way faraxsanyihiin. Baaritaanka maqalka waa uu dhamaadey.

Inta badan caruurta baaritaanka dhegaha mar keli yah ayuu ku dhamaadaa.

Haddii baaritaanka hal dheg ama labadaba aanu fiicnayan consultatiebureau ayaa baaritaanka hal usbuuc ka dib samaynaya haddii weli baaritaanka aanu fiicnayn mar kale ayaa qof ka socda consultatiebureau imanayaa oo qalab wax lagu cabiro wata xitaa qalabkan wax xanuun ah ma laha.

Haddii natiijada baaritaanka aanu fiican macnaheedu ma aha in ilmahaagu aanay wax maqlayn. Baaritaan dheeri ah markaa waa muhiim.

Waxaad u tagaysaa takhtar takhasus ku leh.

Qof ka socda consultatiebureau ayaa ballan kuu samaynaya.

Su'aalo?



Su'aalo?

Miriam iyo Dennis waxay weli qabaan su'aalo.

Waxay weydiinayaa naagta:

“maxaa hadda loo samaynayaa baaritaanka? Ilmuhu weli way yar yihiin?”

Naagtu waxay ku jawaabaysaa:

“haddii ilmuhu aanay si fiican wax u maqal waxaan markiiba eegi karnaa sida aan ilmahaagu ku caawini karno. Taasi waa muhiim.

Si uu si fiican hadalka u barto waa in uu ilmahaagu si fiican wax u maqlaa.”

Waxay kaloo weydiinayaan:

“hadda maqalka ilmahayna weligii ma fiican yahay?”

Naagta waxay ku jawaabaysaa:

“Sida badan haa. Laakiin waalidku waa in ay taxadaraan .

Haddii aad u malaynayso in ay wax si yihiin markaa u tag takhtarka

Ama consultatiebureau.”

Tani waa daabacada:

Hay'dda caafimadka dadweynaha iyo degaanka qaranka

Postbus 1 | 3720 BA Bilthoven

www.rivm.nl

RIVM. *Daryeelka beri maanta ayuu bilaabmaa*

Janaayo 2015

Ma rabtaa intan wax ka badan in aad ogaato oo ku saabsan baaritaanka maqalka *ama ku saabsan maqalka ilmahaaga yar?*

U tag consultatiebureau ee xaafadaada

ama ka wac NSDSK, telefoonkan 020-574 59 45

ama eeg internetka www.rivm.nl/gehoorscreening